Diiwaangelinta Yaraaneysa

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

Maxaa Xal u ah Iskuullada Yaryar?

Guddoonka Waxbarashada ee Denver waxa ay ansixiyeen Xalka Iskuullada Yaryar bishii Juun 2021, oo waxaa la faray degmadu in ay la shaqeyso dadweynaha iskuullada degmada oo dhan si ay wax uga qabtaan diiwaangelinta yaraaneysa ee dugsiyada hoose.

Xalku wuxuu ugu baaqayaa shaqaalaha DPS in ay bilaabaan nidaam ay bulshadu hoggaamiso, oo ay taageerto degmadu si loo sameeyo xal macquul ah oo lagu wejaho diiwaangelinta yaraaneysa, iyada oo la raacayo habraacyo lagu hubinayo barnaamijyada ardeyda, sida waxbarasho fiican oo ku baxaysa laba luuqadood iyadoo la adeegsanayo qaabka Waxbarashada Meelgaarka Luuqadda Hooyo (TNLI).

Waa maxay diiwaangelinta yaraaneysa?

Intii u dhaxaysey 2014 ilaa 2020, DPS waxa ay dugsiyada hoose u diiwaangelisay in ka yar ku dhawaad 5,000 oo arday, oo waxaa la filayaa in uu isbeddelku sii socdo ilaa shanta sano ee soo socota. Yaraanshaha waxaa loo aaneynayaa isbeddalka dadweynaha Denver. Tusaale ahaan, waxaa jiray hoosu-dhac ku yimid carruurtii ku dhalaneysay Denver ilaa iyo 2008. Xaqiiqa ahaan, marka la isu geeyo isbeddelka saamiyada guryaha ee meelo badan oo magaalada ah waa waxa horseeday in ay yaraadaan carruurta da'da gaartay iskuulka ee ku nool deegaanka diiwaangelinta Dugsiyada Dadweynaha ee Denver.

Saameyn intee le'eg ayey diiwaangelinta yaraaneysa ku leedahay iskuullada?

Maaddaama ay hoos u dhacaysay tirada da'da ilmaha ardeyda ah, diiwaangelinta ayaa sidoo kale hoos uga dhacaysay iskuullo badan degmadoo dhan. Marka ay iskuullada ku yar yihiin ardeyda u diiwaangashan, DPS, iskuullada waxaa ku adkaaneysaa in ay maalgelin lacageed oo fiican uga soo helaan barnaamijyada iyo adeegyada waxbarashada ee gobolka. Isbeddelkan waa wax la saadaalinayo in uu sii socon doono shanta sano ee soo socota.

DPS waxa ay baahiyada kala duwan awgeed maalgelin dheeraad ah ku siisaa iskuullada ay degmadu maamusho. Iskuulladaas waxaa ku jira "kabista iskuullada yaryar" ee iskuullada ay dhigtaan arday ka yar 215 iyo "kaalmo miisaaniyad" oo dheeraad ah oo ay ku jiraan iskuulloo ay diiwaangelintoodu yaraaneyso ama la saadaaliyey in ay ardaydu ka yaraaneyso baahidooda ah maalgelinta shaqaalaha iyo barnaamijyada waxbarista, iyo sababo kale.

Saameyn intee le'eg ayey diiwaangelinta yaraaneysa ku leedahay iskuullada?

Maaddaama ay hoos u dhacaysay tirada da'da ilmaha ardeyda ah, diiwaangelinta ayaa sidoo kale hoos uga dhacaysay iskuullo badan degmadoo dhan. Marka ay iskuullada ku yar yihiin ardeyda u diiwaangashan, DPS, iskuullada waxaa ku adkaaneysaa in ay maalgelin lacageed oo fiican uga soo helaan barnaamijyada iyo adeegyada waxbarashada ee gobolka. Isbeddelkan waa wax la saadaalinayo in uu sii socon doono shanta sano ee soo socota.

DPS waxa ay baahiyada kala duwan awgeed maalgelin dheeraad ah ku siisaa iskuullada ay degmadu maamusho. Iskuulladaas waxaa ku jira "kabista iskuullada yaryar" ee iskuullada ay dhigtaan arday ka yar 215 iyo "kaalmo miisaaniyad" oo dheeraad ah oo ay ku jiraan iskuulloo ay diiwaangelintoodu yaraaneyso ama la saadaaliyey in ay ardaydu ka yaraaneyso baahidooda ah maalgelinta shaqaalaha iyo barnaamijyada waxbarista, iyo sababo kale.

Saameyn intee le'eg ayey diiwaangelinta yaraaneysa ku leedahay iskuullada?

Maaddaama ay hoos u dhacaysay tirada da'da ilmaha ardeyda ah, diiwaangelinta ayaa sidoo kale hoos uga dhacaysay iskuullo badan degmadoo dhan. Marka ay iskuullada ku yar yihiin ardeyda u diiwaangashan, DPS, iskuullada waxaa ku adkaaneysaa in ay maalgelin lacageed oo fiican uga soo helaan barnaamijyada iyo adeegyada waxbarashada ee gobolka. Isbeddelkan waa wax la saadaalinayo in uu sii socon doono shanta sano ee soo socota.

DPS waxa ay baahiyada kala duwan awgeed maalgelin dheeraad ah ku siisaa iskuullada ay degmadu maamusho. Iskuulladaas waxaa ku jira "kabista iskuullada yaryar" ee iskuullada ay dhigtaan arday ka yar 215 iyo "kaalmo miisaaniyad" oo dheeraad ah oo ay ku jiraan iskuulloo ay diiwaangelintoodu yaraaneyso ama la saadaaliyey in ay ardaydu ka yaraaneyso baahidooda ah maalgelinta shaqaalaha iyo barnaamijyada waxbarista, iyo sababo kale.

Maxay muhiim u tahay in uu iskuulka kasta haysto diiwaangelin buuxda?

Iskuulka u diiwaangashan si buuxda waxa uu helayaa maalgelin ku filan si ay ardeyda wax ugu baraan si ay u wada siman yihiin, sida:

- Hab waxbaraho qorsheysan oo joogto ah, Jirdhisid, Muustiko, iyo/ama waxbarasho kale.
- Waxbarasho ku habboon fasalka ardeyda iyo aqoon luuqadeed oo ku habboon ardeyda ku hadasha Luuqadaha Badan
- Hibada & Kartida, Waxbarashada Gaarka ah, Waxqabadka Xisaabinta iyo Akhris-qoraalka fasal kasta
- Taageero ah caafimaadka dhimirka sida la-taliyeyaal joogaya iskuulka, xirfadleyaasha cilmi-nafsiga iyo/ama adeeggeyaal dadweyne, iyo shaqaale qaabilsan Hawlaha Dhaqanceliska
- Wakhti in loo qoondeeyo qorsheynta macallimiinta iyo fulinta waxbarasho ku saleysan xog cilmiyeysan
- Awood ay macallimiintu xoogga ku saaraan hal koorso ama heerarka fasallada iyo qiimeyntooda

Maxaa dhacaya markay iskuul ku yaraadan diiwaangelinta ardeyda?

Dugsiyada hoose ee ay ku yar tahay diiwaangelinta ardeyda waxaa ku dhaca in ay isu waafiqi waayaan koorsooyinka la kala doorto, in ay saameyn gaarto waxbarista kaalmeynta ah ee afka hooyo ee TNLI, iyo in ay xadidaan waxqabadka (sida caawinta dheeraadka ah ee Akhris-qoraalka iyo Xisaabta) ama kordhinta (sida maskax-badnaanta Hibada iyo Kartida). Iskuullada ay yar tahay diiwaangelintooda iyo barnaamijyadooda TNLI inta badan waa inay sameeyaan tanaasulaad dheeraad ah iyagoo isku daraya fasallo kala duwan.

Goorma ayaa la hirgelin doonaa isbeddellada iskuullada?

Waa habraac aan hal mar la wada sameyn karin. Aragtidu waa in aysan wax isbeddel ah ka dhicin iskuullada ilaa sannad-dugsiyeedka 2023-24, iyadoo laga reebayo kuwa gaarka ah ee iskuullada qaar oo ku jira duruufo adag oo u baahan in goor hore la xiro sababta oo ah hoos u dhaca weyn ee diiwaangelinta. Ka hor isbeddel kasta, DPS waxay la shaqeyn doontaa shaqaalaha iskuullada, qoysaska, iyo deriska si ay u hagaajiyaan wixii saameeyey dadweynaha.

Iskuulladee loo aqoonsaday in la xiro?

Ma jiro iskuul loo aqoonsaday in la xiro, oo ma jiro liis ah iskuullo loo tixgelinayo in la xiro ama loo tixglinayo in lagu sii daro iskuul kale. Guddiga Talabixinta Diiwaangelinta Yaraaneysa ayaa abuuri doona shuruudaha ay degmadu isticmaali doonto si ay u go'aamiso iskuullada ay tahay in la xiro ama la isku daro.

Maxay la kulmi karaan shaqaalaha iskuulka iyo qoysaska?

Marka iskuullada loo aqoonsado in la isku darayo ama la xirayo, DPS waxaa ka go'an in ay taageerto qoysaska iyo shaqaalaha inta lagu jiro xilliga kala-guurka. DPS iyo guddiga waxay si cad u sheegeen sida ay uga go'an tahay in ay taageeraan shaqaalaha, oo waxaa la kala hormarin doonaa wixii isbeddel ah. DPS waxay sidoo kale qoysaska ka taageeri doontaa qorshe kasta oo ku saabsan kala-guurka iskuullada, kala-doorashada iskuulka, gaadiidka, barnaamijyada gaarka ah, iyo baahiyaha kale ee muhiimka u ah qoysaska iyo ardeyda.

Maxay isbeddeladaas ku keenayaan TNLI iyo barnaamijyada waxbarashada luuqadda?

DPS waxaa mar kasta ka go'an waajibaadka sharciga ah ee ku qeexan Wareegtada Oggolaanshaha. Wareegtadan waxa ay qeexeysaa shuruudaha loo baahan yahay ee lagu xaqiijin karo taageerada luuqadda iyo barnaamijyada waxbarashada luuqadda ee ardeyda ku hadasha luuqadaha badan. Waxaa si qoto dheer loo qiimeynayaa ardeyda iyo qoysaska ku hadla luuqadaha badan oo ay had iyo jeer ka go'an tahay xaqiijinta barnaamijyada waxbarashada luuqadda. Haddii iskuul la xirayo ama lagu daro iskuul kale, fiiro gaar ah ayaa loo yeelan doonaa in ay jiraan barnaamijyo luuqadeed oo fiican oo loogu talagalay ardeyda. Ujeeddada ugu weyn ee wadahadalka xiritaanka iyo isku-daridda waa in la hubiyo in barnaamijyada luuqadaha la taageero oo ay si guul leh ugu adeegaan si loogu taageero ardeyda.

Maxaa ku dhici doona barnaamijyada xarunta waxbarashada gaarka ah haddii iskuul la xiro?

Si la mid ah waajibaadka sharciga ah ee wareegtada oggolaanshaha, waxaa si sharci iyo anshax ah waajib nagu ah si aan u hubin karno in ay ardeyda ku jira barnaamijyada xarunta ku saleysan helaan barnaamijyo tayo leh iyo adeegyo taageerid u ah. Iyada oo aan loo eegin xiritaanka, DPS waxay hubin doontaa in dhammaan ardeyda ku jirta barnaamijka xarunka ku saleysan in ay helaan fursad ay ugu gudbaan barnaamij tayo leh.

Miyey si isku mid ah u yaraanayaan diiwaangelinta waxbarashada hore ee carruurta (ECE)?

Diiwaangelinta ECE waa ay ka duwan tahay diiwaangelinta K-12, oo waxaa si gaar ah loogu maalgeliyaa habka waxbarashada dadweynaha ee K-12. Diiwaangelinta ECE ma aha wax ay dammaanad qaadayaan gobolka Colorado. ECE khasab kuma aha ardeyda qoysas badan oo aan isku diiwaangelin ECE. Arrinan waxa ay ka dhigan tahay in diiwaangelintu aad uga duwan tahay diiwaangelinta K-12, oo ECE ma aha tilmaan cad oo lagu ogaan karo diiwaangelinta K-12. Caadi ahaan, DPS ECE 4 waxay wakiil ka tahay 50% ardeyda xannaannada carruurta. Dhowrkii sano ee la soo dhaafay, DPS waxay horumar weyn ka sameysay xagga kordhinta tirada kuraasta ECE ee ay heli karaan ardeyda, gaar ahaan ardeyda ECE 3. Marka in kasta oo ay diiwaangelinta ECE ahayd mid isku mid ahayd ama korodhay xoogaa, arrintan ma aha mid ka tarjumeysa isbeddellada ku dhacay tirada ardeyda, ee waa shaqo ka mid ah in kuraas dheeraad ah lagu daro.

Iskuullada jaatarka ah miyey ka qeyb qaadan doonaan habka isku-darista iskuullada?

Diiwangelinta yaraaneysa waxay saameysaa iskuul kasta (kuwa degmadu maamusho, kuwa dibu-curinta, iyo kuwa ah jaartarka) ee degmada. Iskuullada jaatarka ah ee DPS waxay ka qeyb qaadanayaan Guddiga Talabixinta Diiwaangelinta Yaraaneysa, si loo abuuro shuruudo isku mid ah oo loo adeegsanayo iskuullada DPS oo dhan. Intaas waxaa sii dheer, iskuullada jaartarka ah ee DPS waa ururro aan ahayn macaashdoon oo waxa ay si buuxda masuul uga yihiin xalkooda dhaqaalaha. Taas macnaheedu waa in aysan heleyn deeq waxbarasho oo dheeraad ah marka ay diiwaangelintu ku yaraato. Go'aanka maaliyadeed waa shuruud muhiim u ah heshiiska ka dhexeeya iskuul kasta oo ah jaartar iyo maamulka degmada, oo iskuullada noocan ah waxaa laga yaabaa inaan mar kale la cusbooneysiin ama in laga joojiyo qandaraaska haddii aysan ambaqaadi karin xaaladdooda dhaqaalaha.

Maxaa sababa diiwaangelinta yaraaneysa? Ma qoysaska Denver ayaa doorta iskuullo gaar ah mise waxay ka guuraan degmada?

Waxaa jira dhowr sababood oo keena hoosu-dhaca tirada ardayda dhigata iskuullada DPS. Waxaan ognahay in kororka kharashka guryaha uu sababay in ay qoysas badan isaga guuraan magaalada. Waxa aan sidoo kale ognahay in uu tobankii sano ee la soo dhaafay si joogto ah u yaraanayey taranka dadka. Xogta diiwaangelinta waxay sidoo kale muujineysaa in ay qoysaska Denver intooda badan doortaan iskuullada DPS. Keliya 8% ka mid ah ardeyda Denver ayaa iska diiwaan geliya degmooyinka kale ee Colorado, oo qiyaastii ilaa 6.6% ayaa dhigta iskuullada gaarka ah.

Maxay degmadu shuruudahan diiradda ugu saartay dugsiyada hoose iyo dhexe?

Xogta diiwaangelinta waxay muujineysaa in ay dugsiyada hoose arkeen hoos u dhicii ugu waynaa tobankii sano ee la soo dhaafay, macluumaadkan waa tilmaame horseed u ah fahamka hoos u dhaca dugsiyada sare. Maaddaama ay koox yar oo ah ardeyda dugsiga hoose ka gudbaan dugsiga dhexe, waxa la arki doono waa arday yar in ay ku jiraan dugsiga dhexe. Waxa kale oo jira in ay dugsiyada hoose aad ugu badan yihiin degmada oo dhan marka loo eego kuwa sare, dugsiyadan waxaa saameyn badan ku yeelanaya caqabadaha diiwaangelinta yaraaneysa.

Miyey shirarka guddiyadu u furan yihiin dadweynaha?

Kulamada guddiga waxaa loo tixgaliyaa "kulamo shaqo" oo waxaa loogu talagalay xubnaha guddiga ee matalaya qoysaska iyo waalidiinta, macallimiinta, maamuleyaasha iskuullada, iyo xubnaha bulshada ee degmada oo dhan. Waxaa jiri doona qoraal kooban oo ah kulanka oo lagu qori doono Bogga Guddiga Talabixinta Diiwaangelinta Yaraaneysa.

Miyey jiraan fursado ah talooyin dadweyne?

Haa, guddigu wuxuu heli doonaa jawaabaha dadweynaha markay sameystaan mabaadi' oo ay qoraan shuruudaha. Waxa kale oo jiri doona jawaabo dadweyne ka dib marka la sameeyo shuruudaha. Fursadaha jawaabaha dadka waxaa lagu soo qori doonaa bogga Bogga Guddiga Talabixinta Diiwaangelinta Yaraaneysa.